

Baaq Degdeg ah : oo ku Saabsan Qabashada Doorashooyinka Golaha Wakiiladda iyo Degmooyinka Somaliland ee 2026

Xarunta Dimuqraadiyadda iyo Maamulwanaaga (CDG) waxay aad uga walaacsan tahay suurtagalnimada dib-u-dhac ku yimaadda doorashooyinka Wakiiladda iyo Golayaasha Deegaanka ee Somaliland oo la qorsheeyay inay qabsoomaan bisha May 2026. Doorashooyinka oo si waqtiyeysan iyo hufan loo qabto waa lama huraan si loo xoojiyo hanaanka dimuqraadiyadeed ee Somaliland iyo si muwaadiniintu u helaan xuquuqdooda siyaasadeed.

Taariikh ahaan, doorashooyinka Somaliland waxay la kulmeen dib-u-dhacyo soo noqnoqday oo dhaafay wakhtigii dastuuriga ahaa, taasoo keentay jahawareer xagga hay'adaha ah iyo walaac bulsho. Si looga fogaado arrintan, CDG waxay ugu baaqaysaa dhammaan dhinacyada ay khusayso, oo ay ka mid yihiin Dowladda Somaliland, Guddiga Doorashooyinka Qaranka (NEC), iyo sardexda xisbi ee waaweyn—KAAH, WADDANI, iyo KULMIYE—inay si wadajir ah uga shaqeeyaan sidii doorashooyinka loogu qaban lahaa xilliga loogu talagalay ee May 2026.

CDG waxay aqoonsan tahay in shacabku, rag iyo dumarka, ay si weyn u danaynayaan inay u tartamaan doorashooyinkan. Sidaa darteed, waa mas'uuliyadda dhammaan daneeyeyaasha doorashooyinka inay ilaaliyaan xuquuqda dimuqraadiga ah ee dadweynaha iyagoo xaqiijinaya hab doorasho oo cadaalad ah, hufan, oo waqtigiisa ku qabsooma.

Waxaan ugu baaqaynaa Dowladda Somaliland iyo NEC inay dhamaystiraan dhammaan diyaar-garowga doorashooyinka, oo ay ka mid yihiin diiwaangelinta codbixiyayaasha, qorshaynta hawlaha farsamo, iyo dejinta xeerarka sharciga ah, si looga fogaado wax caqabad ah oo keeni karta dib-u-dhac. Waxaan sidoo kale ugu baaqaynaa xisbiyada siyaasadeed inay si wax-ku-ool ah uga qaybqaataan hanaanka doorashada oo ay muujiyaan ballanqaadkooda dimuqraadiyadeed.

loo xoojiyo muhiimadda iyo xisaabtanka hanaanka doorashada, CDG waxay muujinaysaa muhiimada sameynta koox cadaadis ah (Pressure Group) oo ka kooban ururada bulshada rayidka ah, falanqeyeyaasha siyaasadda, warbaahinta, iyo muwaadiniinta ka walaacsan arrintan. Kooxdan waxay si firfircoon u kormeeri doontaa horumarka diyaar-garowga doorashada, waxayna ka shaqayn doontaa in la helo hufnaan iyo isla xisaabtan ay yeelan doonaan dhinacyada ay khusayso. Kooxdan cadaadiska ah waxay u adeegaysaa sidii ilaaliye madaxbannaan si loo hubiyo in aan wax dib-u-dhac ah dhicin, iyo in codka shacabka la maqlo lana ixtiraamo.

CDG waxay sii wadi doontaa inay dhiirrigeliso dawlad-wanaagga dimuqraadiga ah waxayna si dhow ula socon doontaa horumarka arrintan. Waxaan ku boorinaynaa dhammaan daneeyeyaasha doorashada inay mudnaanta siiyaan qabsoomidda waqtiga loogu talagalay ee doorashooyinka 2026 si loo ilaaliyo sumcadda dimuqraadiga ah iyo xasilloonida Somaliland.